



Ku soo
dhawaada
bilowga
waxbarashada

Warbixino ku saabsan
bilowga waxbarashada oo
waalidka loogu talogalay

Bilowga waxbarashada ah iyo bilaabisteeda

Ilmahaaga sanadkiisa bilowga waxbarashadu wuxuu bilaabmayaa deyrta 2022

Ilmahaagu wuxuu ka qeygalayaa bilowga waxbarashada sanad ka hor inta uunan bilaabin waxbarashada waajibka ku ahi, sida qaalibka ah sanadkaasi waa sanadka uu ilmuu buuxinayo lixda sano.

Kaarina bilowga waxbarashada waxaa laga diyaariyaa xanaano maalmeedyada degmadu leedahay iyo kuwo madaxa banaanba. [Halkan](#) ayaad ka heleysaa xarumaha bilowga waxbarashada liiskooda.

Isku soo diiwaangelinta bilowga waxbarashada

- ka soo diiwaangeli ilmahaaga bilowga waxbarashada ee bilaashka ah ilaa iyo ugu dambeyntii 11.2.2022 dhinaca adeegga elektarooniga ah
- goobahaa waxaa go'aanka laga gaadhayaa ilaa iyo ugu dambeyntii 10.3.2022

² [Ka daneysiga elektarooniga ah ee Kaarina](#)

Dhameystirka bilowga waxbarashada ee korriinka curdinka ah

Dhameystirka korriinka curdinka ah waxaa lagu bixinaya goobta bilowga waxbarashada aroortii inta aan la bilaabin bilowga waxbarashada iyo gelinka dambe marka ay dhamaato bilowga waxbarashadu. Shaqaale isku mid ah uun baa maalintii ka wada shaqeynaya.

- u dalab ilmahaaga haddii aad u baahan tahay dhameystirka korriinka curdinka ah ilaa iyo ugu dambeyntii 11.2.2022
- go'aaminta goobahaa waxaa la gaadhayaa ilaa iyo ugu dambeyntii 10.3.2022

[Ka daneysiga elektarooniga ah ee Kaarina](#)

Korriinka curdinka ah bixintisu wuxuu u cayiman yahay saacadaha sida ay u dhigmaan. Warbixinaha dheeraadka ah ee cadadka saacadaha ama biilasha:

[Kaarina bixinta korriinka curdinka ah](#)

Sanadka waxbarashada bilowga ah

Waxbarashada bilowga ah waxaa la bixiyaa afar (4) saacadood maalintii inta ugu badana waa xilliyadu ay iskuuladu howlgalaan. Xilliga waxbarashada bilowga ahi xarun walba waa u gaar waxayna u badan tahay maalinta galinkeeda hore.

Sanadka bilowga waxbarashadu carruurta waa ku waajib. Ilmaha korriinkiisa, kobociisa ay dhinaca waxbarashadiisaba waa u muhiim, in uu uga qeybgalo waxbarashada bilowga ah si joogto ah. Si joogto ah uga qeybgalkaasi wuxuu kaalmeynayaa bulshonimada iyo kobcinta xirfadaha bulsho la dhaqanka.

Maqnaanshaha suurtogalka ah ee ilmaha waa in horey loo soo wargeliyaa kooxda waxbarashada bilowga ah. Maqnaanshaha kadiska ah sida tusaale ahaan maqnaansho jiro, waa in sida ugu dhakhsaha badan loo soo wargeliyo kooxda waxbarashada bilowga ah.

Waxbarashada bilowga ahi waa lacag la' aan macluumaadka loo baahan yahayna waxaa laga helayaa waxbarashada bilowga ah.

Haddii uu ilmahaagu ka qeybgalo kaliya waxbarashada bilowga ah, kaligii wuu iman karaa, haddii jidka uu soo marayaa ammaan yahay. Markaasna **keli imaatin kaas waxbarashada bilowga ah** waalidka ayaa masulliyadu ka saaran tahay.

Ilmahaagu wuxuu xaqq u leeyahay gaadiid iskuulka keena oo lacag la'aan ah, waa marka uu ka qeybgalayo kaliya waxbarashada bilowga ah ee jidka uu soo marayaana ka dheer yahay 5 kilometir oo lug ah

AMA

- Ilmaha da'adiisa ama xaaladiisa kale marka loo eego, safarkaasi uu aad ugu adag yahay, ku dhib badan yahay ama halis ku yahay

AMA

- Ilmuu uu dhigto xanaano maalmeedka guryaha lagu hayo ee loo buuxinayo xilliyada korriinka curdinka ah

[Warbixinaha dheeraadka ah ee gaadiidka iyo codsiyada gaadiidka iskuulka keenayao ka tagidooda](#)

Sanadka waxbarashada bilowga ah

Haddii ay jirto in ilmahaagu cuntooyin gooni ah uu cuno ama baahiyo kale oo la xidhiidha nafaqadiisu ay jiraan, u soo gudbi cuntooyinka uu khaaska u cuno warbixintooda iyo sidoo kale cadeynta dhakhtarka ee cadeyneysa madaxda xanaano maalmeedka.

Farriin isku gudbinta gurigga iyo iskuulka ka dhaxaysa waxaa la isugu diraa Wilmada. Intaas waxaa dheer Wilmada waxaa ku jira ilmaha qorshiiisa waxbarasho ee waxbarashada bilowga ah. Ilmaha waxbarashadiisa iyo warqadaha kaalmadiisu si toos ah ayey ugu gudbayaan waxbarashada aasaasiga ah ee Kaarina.

Waxbarashada bilowga ah sanadka lagu jiro waxaa xidhiidh la sameeyaa **wada shaqeyn lala yeesho iskuulka u dhow**.

Shaqada- iyo fasaxyada - xilliyadoo 2022-2023

Xilliyadaa fasaxyada ee hoos ku xusan howlaha korriinka curdinka ah waxaa la isugu koobayaa xanaano maalmeedyada heeganka ah.

Sanad dugsiyeedka deyrta

10.8. - 21.12.2022

Fasaxyada:

- Fasaxa deyrta 17. - 21.10.2022
- Fasaxa kirismaska 22.12.2022 - 8.1.2023

Sanad dugsiyeedka guga 9.1. - 31.5.2023

Fasaxyada:

- Fasaxa barafka 20. - 24.2.2023

Qorshaha waxbarashada bilowga ah

"Ilo kasvaa yhdessä toimien"

**Kaarinan kaupungin
esiopetussuunnitelma
2016**



kansikuva: Maija Elmänen

Ilmo walba waxaa loo dejinayaan xilligga deyrta qorshe waxbarasho oo u gaar ah waxbarashadiisa bilowga ah taas oo ay wada dejinayaan macallimada bilowga waxbarashada, ilmaha iyo sidoo kale waalidkiisa.

Qorshahaas waxaa la qiimeynayaan gebi ahaantiisaba janaayo-febraayo dhexdooda iyo sidoo kale xilligga guga inta aynan bilowga waxbarashadu dhamaanin.

Qorshahaas mar walba waalidku waxay ka arki karaan Wilmada.

Waxaa farxad noo ah korriinka howlaha wada shaqeynta ah

Waxbarashada bilowga ah gebi ahaanba waxbarashadeeda t

- Qaabab badan u soo bandhigid
- Duni luqadda hodan ku ah
- Aniga iyo deegaankeena
- Waan baadhaya kana howlgalayaa deegaankeena Waan korayaa oo aan kobcayaa

Aqoonta ballaadhan ee waxbarashada bilowga ah

- Ka fikirka iyo waxbarashada
- Dhaqamada aqoontooda, dhexgalka iyo soo muujinta
- Daryeelidda naftaada iyo xirfadaha nolol maalmeedka
- Xarfada akhriska badan- iyo Aqoonta- iyo barashada farriimaha teknolojiyada
- Ka qeyb qaadashada iyo saameyn ku yeelashada



Xirfadaha nolosha

⁶ Qorshaha waxbarashada bilowga ee Kaarina waxaad ka akhrisan kartaa [halkan](#).

Korriinka iyo waxbarashada kaalmadooda waxbarashada bilowga ah

Waxbarashada bilowga ah waxaa ka qeybgala ilmaha ka tirsan sida uu dhigayo sharciga waxbarashada aasaasiga ahi xeyndaabka kaalmada waxbarashada. Sida uu sharcigu dhigayo ilmuu wuxuu xaqq u leeyahay inuu helo kaalmo ku filan iyo hagitaan waxbarasho isla marka ay soo muuqato baahida kaalmaduba. Kaalmada waxaa ilmaha lagu siinayaan kooxdiiisa waxbarashada bilowga ah dhexdeeda. Ilmaha korriinkiisa iyo kaalmadda waxbarashadiisa saddexda heer ahi waxay kala yihiin kaalmada guud, tan la xoojiyey iyo kaalmadda khaaska ah. Ilmuu kaalmadda wuxuu marka hore uga heleyaa kooxda waxbarashadiisa bilowga ah dhexdeeda si cilmiyeysan iyo nidaamyo kale oo dabacsan iyadoo loo siinayo.

Kaalmadda iyo caawimaada xilligga lagu jiro sanadka waxbarashada bilowga ah

Daryeelka ardeyda xilligga waxbarashada bilowga ah

Daryeelka ardeyda ee waxbarashada bilowga ahi waxay ka kooban yihiin koox shaqo oo xirfado kala duduwan leh, kuwaas oo ay ka tirsan yihiin cilmi nafsi yaqaanka iskkulka- iyo adeegga nidaamka iyo anshaxa (kuraattori) iyo sidoo kale daryeelka caafimaadka. Adeegga daryeelka caafimaadka ilmaha ku jira da'adii waxbarashada bilowga ah waxaa laga siiyaa xanaanada dhallaanka.

Halkan ayaad ka heleysaa wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan waxbarashada khaaska ah ee ay Kaarina u diyaariso waxbarashada bilowga ah

Waa goobta ugu
wanaagsan ee
lagu koro laguna
weyniado.

Waxaan isku
arki doonaa
waxbarashada
bilowga ah
arbacada
10.8.2022

